

Going to court

Information for witnesses and victims going to magistrates' court or the Crown Court

Maxkamad aadid

War loogu talogalay dhibbaneyaasha iyo marqaatiyada aadaya maxkamadaha degmaada ama Maxkamadda Denbiyada Culus.

Maxkamad miyaad aadeysaa?

Maxkamadda oo loo aado sidii marqaati ama sidii dhibbane denbi waxay ahaan kartaa khibrad wel wel leh, gaar ahaan haddii ay markii kuugu horreysay tahay aaddanna garaneyn waxaad ka fisho.

Qaababka maxkamaddu waxay ahaan karaan kuwo jaha wareer leh. Warqaddaan qoran waxay kuu sheegeysaa sida loo helayo war iyo taageero kaa caawin doona inaad si aan kugu adkayn daliil u bxisid.

Adeegga Marqaatiga

Witness Service (Adeegga Marqaatigu) wuxuu caawiyaa marqaatiyada, dhibbaneyaasha, goysaskooda iyo saaxiibbaddood ka hor, inta lagu jiro dhegeysiga iyo ka dib intaba.

Waxaa hawlgeliya Victim Support (Taageerada Dhibbanaha), hay'adda samafalka qaranka taasoo dadka ka caawisa inay si dhib yar ula macaamilaan denbiga.

Waxaa jira Adeeg Marqaati ee xarun kasta ee Maxkamad Denbiyo culus iyo maxkamadaha deegaanka ee ku yaal Igland iyo Wayles.

Adeeggu waa bilaash waana mid kalsooni leh.

Mutadawiciinta la tababaray waxay bixiyaan taageero dareen iyo war camali ah oo ku saabsan qaababka maxkamadda.

Adeegga Marqaatigu si hore ayuu caadi ahaan kaagala soo xiriiri doonaa dhegeysiga maxkamadda si uu kuugu deeqo adeegyadiisa.

Adeegga Marqaatigu wuxuu caawiyaa

- marqaatiyada loogu yeeray inay daliil bixiyaan, marka lagu daro marqaatiyo difaac
- dhibbanyaasha denbiga iyo qoysaskooda iyo saaxiibbadooda u imaanaya maxkamadda sabab kastoo ay noqoto
- carruurta iyo sidoo kale dadka waaweyn.

Haddii aad maxkamadda tegeysid, waxaa laga yaabaa inaad u aragtid mid waxtar leh haddii aad qaadatid waxyaabah soo socda

- saaxiib ama qaraabo – uma baahnid inaad keligaa timaaddid maxkamadda (Central Criminal Court (Maxkamadda Dhexe ee Denbiyada), ee loo yaqaanno Old Bailey, waxaa lagaa doonayaa inaad ogeysiis horey u sii bixisid oo aad ku sheegeysid inaad qof la imaaneysid)
- wixii war ah ee aad ka haysid arrinka (tusaale, magaca sarkaalka booliiska arrinkaaga gacanta ku haya, haddii aad taqaannid)
- warqadda ku weydiineysa inaad maxkamadda timaaddid, haddii ay mid kuu timid
- wax la akhriyo ama la sameeyo – waxaa laga yaabaa inaad waqti dheer sugtid in arrinkaaga lagu dhawaaqo
- lacag qiimayowga maalinta lagu bixiyo, sida baabuur meel dhigashada ama cabitaanka iyo cunto fudud.

Codsiga kharajyada

Haddii laguugu yeeray marqaati furid, waxaad codsan kartaa kharajka kaa baxay marka uu xukunku dhammaado. Kharajyadaan waxaa ku jiri kara safarka aad maxkamadda ku aadday, daryeelka ilmaha lagama maarmaan ka ah, ama kasabkaagii oo aad seegtay. War dheeraad ah oo ku saabsan codsiga kharajyada weydii Adeegga Marqaatiga.

Ballanqaadkeenna

Taageerada Dhibbanuhu waxay adeeg ugu deeqeysaa dhammaan qaybaha mujtamaca waxaana ka go'an xaqiijinta in kooxaha laga badan yahay iyo kuwa aan faa'iideysanba la soo dhaweeyo lagana qayb geliyo ururka oo dhan.

Taageerada Dhibbanuhu waxay soo dhaweeyneysaa faallooyinka iyo soo jeedinnada ku saabsan adeegga loo qabto dhibbanyaasha denbiga. Waxaa sidoo kale jira qaab dacwo oo rasmi ah,

Somali

April 2002

Abriil 2002

haddii ay kula tahay in arrimuhu meel xun mareen. Fadlan la xiriir laanta Victim Support (Taageerada Dhibbanaha) / Witness Service (Adeegga Marqaatiga) ama Xafiiska Qaranka ee deegaankaaga si aad warar dheeraad ah u heshid.

Warar dheeraad ah

Waxaa laga yaabaa inaad mid waxtar leh u aragtid inaad tixraacdid warqadda qoran ee *Witness in Court (Marqaatiga Maxkamadda)*, oo uu daabacay Home Office (Wasaaradda Arrimaha Guduhu). Haddii aad warqad ka heshay booliiska deegaankaaga isagoo kaala talinaya taariikhda aad imaaneysid maxkamadda, nuqulka warqaddaas waa in sidoo kale lagu soo lifaaqaa.

Adeegga Marqaatigu wuxuu ku deeqi karaa

- qof si kalsooni leh loola hadlo
- booqasho lagu tago xarunta maxkamadda iyo, meeshii ay suuragal ka tahay, eeg eegidda qolka maxkamadda ka hor inta aan laguugu yeerin marqaati furid
- warar ku saabsan qaababka maxkamadda
- goob deggen oo loogu talagalay in ku sugtid ka hor iyo waqtiga dhegeysiga maxkamadda
- qof kuu raaca maxkamadda haddii aad daliil bixineysid
- caawino camali ah, tusaale ahaan foomamka kharajka
- in lagula xiriiriyo dadka ka jawaabi kara su'aalo gaar ah oo ku saabsan arrinkaaga (Adeegga Marqaatigu kama hadli karo daliil ama kuma deeqi karo talobixin sharci ah)
- fursad looga hadlayo arrinka marka uu dhammaado iyo si loo helo caawino iyo war dheeraad ah.

Haddii aad u socotid maxkamad adigoo marqaati ah ama dhibbane denbi ah, Adeegga Marqaatigu wuxuu ku siin karaa taageero kalsooni leh oo bilaash ah si uu kaaga caawiyo inaad uga gudubtid.

Kala xiriir Witness Service (Adeegga Marqaatiga)

Victim Supportline (Khadka Taageerada Dhibbanaha)



0845 30 30 900

Khadka Taageerada Dhibbanaha ayaa sidoo kale kula xiriirin kara Adeegga Marqaatiga ee deegaankaaga.

Waxaa daabacay Victim Support (Taageerada Dhibbanaha)
Madaxa HRH ee Princess Royal

Victim Support National Office, Cranmer House,
39 Brixton Road, London, SW9 6DZ
Telefoon: 020 7735 9166 Faakis: 020 7582 5712
Shabakad: www.victimsupport.org

Diiwaan gelinta Hay'adda: 298028 Lambarka Shirkadda: 2158780
Waxaa laga diiwaan geliyey Dammaanadda Xaddidan ee Igland
Xafiiska Diiwaan geliyey sida kore.